# Xuquuqda Bukaanka ee Xarunta Qalliinka Bukaansocodka

## SHARCIGA XUQUUQDA BUKAANKA IYO DEGGANEYAASHA EEXARUMAHA DARYEELKA CAAFIMAADKASIDA KU QEEXAN XEERKA 144.651

## Ujeeddada Sharci-dejinta

Ujeeddada sharci-dejinta iyo hadafka qaybtan waa in la dhiirrigeliyo danaha iyo fayo-qabka bukaanka iyo degganeyaasha xarumaha daryeelka caafimaadka. Ma jiro xarun daryeel caafimaad oo ku qasbi karta bukaan ama degane inuu ka tanaasulo xuquuqdan si shuruud ahaan loogu oggolaado gelitaanka xarunta. Mas'uul sharci ah (guardian) ama ilaaliye maaliyadeed (conservator) oo matalaya bukaan ama degane, ama haddii uusan jirin mas'uul sharci ah ama ilaaliye maaliyadeed, qof danaynaya (interested person), ayaa xaq u leh inuu dalbado fulinta xuquuqdan isaga oo ku hadlaya magaca bukaanka ama deganaha. Qof danaynaya ayaa sidoo kale xaq u leh inuu dalbado fulinta xuquuqdan isaga oo matalaya bukaan ama degane leh mas'uul sharci ah ama ilaaliye maaliyadeed, iyada oo loo marayo hay'adaha maamulka ama maxkamadda degmada ee awoodda u leh arrimaha mas'uuliyadda iyo ilaalinta (guardianships and conservatorships).Inta ay socoto dacwad ku saabsan fulinta xuquuqdan, xarunta daryeelka caafimaadka waxay, si niyad-wanaag ah, ugu hoggaansami kartaa tilmaamaha mas'uulka sharci ah ama ilaaliyaha maaliyadeed. Ujeeddada qaybtan waa in la hubiyo in dhammaan xuquuqda madaniga iyo tan diimeed ee bukaanka—oo ay ku jirto xaqa go'aamada shakhsiyeed ee madaxbannaan iyo helitaanka macluumaad ku saabsan xulashooyinka la heli karo—aan lagu xadgudbin, isla markaana xaruntu ay dhiirrigeliso oo ka caawiso bukaanka isticmaalka ugu buuxa ee suurtagalka ah ee xuquuqdan.

## Qeexid

Ujeeddada dukumeentigan, erayga "bukaan" wuxuu ka dhigan yahay qof hela adeegyo daryeel caafimaad oo laga bixiyo xarun qalliinka bukaansocodka.

## Macluumaad ku saabsan Xuquuqda

Bukaanka waa in, marka la qaabilayo (admission), lagu wargeliyaa in ay leeyihiin xuquuq sharci ah oo ilaalinaysa inta ay ku sugan yihiin xarunta ama inta ay socoto daryeelkooda, daaweyntooda, iyo ku-noolaanshahooda bulshada. Xuquuqdan waxaa lagu faahfaahinayaa qoraal la socda oo ka hadlaya xuquuqda iyo waajibaadka khuseeya ee lagu qeexay qodobkan. Waxaa la samayn doonaa hagaajin macquul ah (reasonable accommodations) si loogu fududeeyo dadka qaba caqabado isgaarsiineed iyo kuwa ku hadla luuqad ka duwan Ingiriisiga.Siyaasadaha hadda jira ee xarunta, natiijooyinka kormeerka ee ay sameeyeen hay'adaha caafimaadka ee heer gobol iyo heer deegaan, iyo sharaxaad dheeraad ah oo ku saabsan qoraalka xuquuqda, waa in loo heli karaa bukaanka, mas'uuliyadooda sharci (guardians), ama wakiillada ay doorteen, marka ay si macquul ah uga codsadaan maamulaha xarunta ama shaqsi kale oo loo xilsaaray arrintaas. Arrintani waa in ay waafaqsanaataa Cutubka 13aad ee Sharciga Ilaalinta Xogta iyo Qodobka 626.557, kaas oo la xiriira ilaalinta dadka waaweyn ee nugul .

## Daryeel ixtiraam iyo sharaf leh

Bukaanka waxay xaq u leeyihiin in si edeb, xushmad, iyo tixgelin shakhsiyadeed loola dhaqmo, taas oo ay sameeyaan shaqaalaha ama dadka bixiya adeegyada xarunta daryeelka caafimaadka.

## Daryeel caafimaad oo ku habboon

Bukaanka waxay xaq u leeyihiin daryeel caafimaad iyo mid shakhsiyeed oo ku habboon, kuna salaysan baahiyahooda gaarka ah.

## Aqoonsiga dhakhtarka, kalkaalisada heerka sare, ama kaaliyaha dhakhtarka

Bukaanka waa in ay haystaan ama lagu siiyo, qoraal ahaan, magaca, cinwaanka ganacsiga, lambarka taleefanka, iyo takhasuska (haddii uu jiro) ee dhakhtarka, kalkaalisada heerka sare ee diiwaangashan (Advanced Practice Registered Nurse), ama kaaliyaha dhakhtarka (Physician Assistant) ee mas'uulka ka ah isku-duwidda daryeelkooda. Haddii ay caafimaad ahaan habboonayn in macluumaadkan la siiyo bukaanka—sida ku cad diiwaanka bukaanka ee uu qoray dhakhtarka daweynaya, kalkaalisada heerka sare, ama kaaliyaha dhakhtarka—macluumaadka waa in la siiyaa mas'uulka sharci ah ee bukaanka ama qof kale oo bukaanku u magacaabay wakiil.

## Xiriirka adeegyada kale ee caafimaadka

Bukaanka hela adeegyo ka imanaya bixiye dibadeed waxay xaq u leeyihiin, marka ay codsadaan, in lagu wargeliyo aqoonsiga bixiyahaas. Macluumaadku waa inuu ka koobnaadaa magaca bixiyaha dibadeed, cinwaankiisa, iyo sharaxaad ku saabsan adeegga la bixin karo. Haddii ay caafimaad ahaan habboonayn in macluumaadkan la siiyo bukaanka—sida ku cad diiwaanka daryeelka bukaanka ee uu qoray dhakhtarka daweynaya, kalkaalisada heerka sare, ama kaaliyaha dhakhtarka—macluumaadka waa in la siiyaa mas'uulka sharci ah ee bukaanka ama qof kale oo bukaanku u doortay wakiil.

## Macluumaad ku saabsan Daaweynta

Bukaanka waa in ay ka helaan dhakhaatiirtooda, kalkaalisada heerka sare ee diiwaangashan (Advanced Practice Registered Nurse), ama kaaliyeyaasha dhakhtarka (Physician Assistant), macluumaad dhammaystiran oo cusub oo ku saabsan cudurka laga helay, daaweynta, ikhtiyaarrada kale ee daaweynta, khataraha, iyo saadaasha natiijada, sida uu qabo waajibaadka sharci ee saaran dhakhtarka, kalkaalisada heerka sare, ama kaaliyaha dhakhtarka ee bixinta macluumaadka.Macluumaadkan waa in lagu bixiyaa ereyo iyo luuqad ay bukaanku si macquul ah u fahmi karaan. Bukaanka waxaa la oggol yahay in ay la socdaan xubin qoyska ka tirsan ama wakiil kale oo ay doorteen. Macluumaadku waa inuu sidoo kale ka koobnaadaa natiijooyinka caafimaad ama maskaxeed ee waaweyn ee la filan karo ee daaweynta iyo ikhtiyaarradeeda kale.Haddii ay caafimaad ahaan habboonayn in macluumaadkan la siiyo bukaanka, sida lagu caddeeyey diiwaanka caafimaadka bukaanka ee uu qoray dhakhtarka daweynaya, macluumaadka waa in la siiyaa mas'uulka sharci ah ee bukaanka ama qof kale oo bukaanku u magacaabay wakiil ahaan. Qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu

diido helitaanka macluumaadkan. Bukaan kasta oo la ildaran nooc kasta oo kansarka naasaha ah waa in si buuxda loo wargeliyaa, ka hor ama waqtiga gelitaanka xarunta, iyo inta ay ku sugan yihiin xarunta, dhammaan hababka kale ee waxtarka leh ee daaweynta ee uu yaqaanno dhakhtarka daweynaya, kalkaalisada heerka sare, ama kaaliyaha dhakhtarka. Tan waxaa ka mid ah daaweynta qalliinka, shucaaca, ama kiimiko-daaweynta, ama isku-darka hababkan, iyo khataraha la xiriira mid kasta oo ka mid ah hababkaas.

## Ka-qaybgalka qorshaynta daaweynta; wargelinta xubnaha qoyska

Bukaanka waxay xaq u leeyihiin inay ka qaybqaataan qorshaynta daryeelkooda caafimaad. Xuquuqdan waxaa ku jira fursadda ay kula hadli karaan daryeel-bixiyeyaasha shakhsiyeed ee ku saabsan daaweynta iyo ikhtiyaarradeeda kale, iyo xaqa ay u leeyihiin inay ku daraan xubin qoys ama wakiil kale oo ay doorteen, ama labadaba.

## Qofka taageerada loo xusho

Bixiyaha daryeelka caafimaadka iyo xarunta daryeelka caafimaadka waa in ay oggolaadaan, ugu yaraan, hal qof oo taageero ah oo bukaanku doortay, oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn bukaanka uurka leh, in uu si jireed ula joogo bukaanka inta uu helayo adeegyada daryeelka caafimaadka, oo ay ku jirto muddada uu ku jiro isbitaalka. Xaruntu waa in ay sidoo kale oggolaataa, ugu yaraan, hal qof oo taageero ah oo deganuhu doortay in uu si jireed ula joogo deganaha waqtiyada uu deganuhu doorto inta uu ku nool yahay xarunta.

Qofka taageerada loo xusho waxaa loola jeedaa qof kasta oo uu bukaanku doorto si uu u siiyo raaxo iyo taageero bukaanka ama deganaha, waxaana ka mid noqon kara, balse aan ku koobnayn, xaaska ama sayga bukaanka ama deganaha, lammaanaha, xubin qoyska ka tirsan, ama qof kale oo xiriir dhow la leh.

Xaruntu waxay xaddidi kartaa ama mamnuuci kartaa joogitaanka qofka taageerada loo xusho gudaha qolalka daaweynta, qolalka hawlgallada, ama qolalka qalliinka marka xaddidaadda ama mamnuuciddaasi si adag lagama maarmaan u tahay si loo ilaaliyo heerka daryeel ee ku habboon. Xaruntu sidoo kale way xaddidi kartaa ama mamnuuci kartaa joogitaanka qofka taageerada loo xusho haddii qofkaas uu u dhaqmo si rabshad leh ama hanjabaad ah oo khatar ku ah dadka kale. Xaddidaad kasta ama mamnuucid kasta oo ay xaruntu ku soo rogto qofka taageerada loo xusho waxa ay hoos imanaysaa habraaca cabashada gudaha ee qoran ee xarunta, sida ku qeexan qaybta cabashooyinka ee hoos ku xusan.

## Xaqa diidmada daryeelka

Bukaanka leh awood maskaxeed oo buuxda waxay xaq u leeyihiin in ay diidaan daaweynta, iyagoo ku saleynaya macluumaadka lagu bixiyey qaybta Macluumaad ku saabsan Daaweynta ee kor ku xusan. Xaaladaha uu bukaanku awoodi waayo inuu fahmo duruufaha jira balse aan si sharci ah loogu go’aamin in uusan lahayn awood maskaxeed, ama marka shuruudaha sharcigu xaddidaan xaqa diidmada daaweynta, xaaladaha iyo duruufahaas waa in si buuxda loogu diiwaangeliyaa diiwaanka caafimaadka bukaanka, waxaana diiwaangelinaya dhakhtarka daweynaya, kalkaalisada heerka sare ee diiwaangashan, ama kaaliyaha.

## Cilmi-baaris tijaabo ah

Oggolaansho qoraal ah oo xog-ogaal ah waa in la helaa ka hor inta uusan bukaanku ka qaybgelin cilmi-baaris tijaabo ah. Bukaanka waxay xaq u leeyihiin in ay diidaan ka-qaybgalka cilmi-baarista. Oggolaanshaha iyo diidmada labadaba waa in lagu diiwaangeliyaa diiwaanka daryeelka shakhsiga ah.

## Xorriyad ka madax-bannaan xadgudub

Bukaanka waa in ay ka madax-bannaanadaan xadgudub, sida lagu qeexay Sharciga Ilaalinta Dadka Waaweyn ee Nugul (Vulnerable Adults Protection Act). Ereyga "xadgudub" wuxuu loola jeedaa dhaqan lagu qeexay Qodobka 626.5572, qaybtiisa 15aad, ama fal si ula kac ah oo aan daaweyn ahayn oo lagu keeno xanuun jireed ama dhaawac, ama dhaqan joogto ah oo loogu talagalay in lagu abuuro dhibaato maskaxeed ama mid shucuur ah. Bukaan kasta sidoo kale waa inuu ka madax-bannaanadaa isticmaalka aan daaweyn ahayn ee xakameynta kiimiko iyo mid jireed, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah ee si buuxda loo diiwaangeliyey, ama marka si qoraal ah loo oggolaado ka dib baaritaan uu sameeyo dhakhtarka bukaanka, kalkaalisada heerka sare, ama kaaliyaha dhakhtarka, muddo cayiman oo kooban, isla markaana kaliya marka ay lagama maarmaan noqoto si looga ilaaliyo bukaanka inuu is-dhibaateeyo ama uu waxyeello u geysto dadka kale.

## Asturnaanta daaweynta

Bukaanka waxay xaq u leeyihiin in si xushmad iyo asturnaan leh loola dhaqmo marka la bixinayo barnaamijkooda daryeelka caafimaad iyo kan shakhsiyeed. Wadahadallada ku saabsan kiisaska, la-tashiyada, baaritaannada, iyo daaweynta waa arrimo sir ah waana in si qarsoodi ah oo edeb leh loo fuliyaa. Asturnaanta waa in la ilaaliyaa inta lagu jiro isticmaalka musqusha, qubayska, iyo hawlaha kale ee nadaafadda shakhsiyeed, marka laga reebo xaaladaha ay lagama maarmaan u tahay badbaadada bukaanka ama bixinta caawimaad.

## Sirta diiwaannada

Bukaanka waa in loo hubiyaa in si sir ah loola macaamilo diiwaannadooda shakhsiyeed iyo kuwa caafimaad, waxayna xaq u leeyihiin inay oggolaadaan ama diidaan in diiwaannadaas loo sii daayo qof kasta oo ka baxsan xarunta. Nuqullo ka mid ah diiwaannada iyo macluumaadka qoraalka ah ee ka imanaya diiwaannada waa in la heli karaa si waafaqsan qodobkan iyo Xeerka Minnesota 144.335. Xuquuqdan kuma dabaqna baaritaannada cabashooyinka iyo kormeerka ay sameyso Waaxda Caafimaadka, marka ay qasab ku tahay heshiisyada bixinta lacagaha ee dhinac saddexaad, ama marka sharcigu si kale u oggolaado.

## Adeeg jawaab-celin leh

Bukaanka waxay xaq u leeyihiin in su'aalahooda iyo codsiyadooda looga jawaabo si degdeg ah oo macquul ah..

## Asturnaanta shakhsiga

Bukaanka waxay xaq u leeyihiin in si buuxda loo tixgeliyo asturnaantooda, shakhsiyaddooda, iyo aqoonsigooda dhaqan, si la xiriira fayo-qabkooda bulsho, diimeed, iyo maskaxeed. Shaqaalaha xaruntu waa in ay ixtiraamaan asturnaanta qolka bukaanka iyagoo garaacaya albaabka oo dalbanaya oggolaansho ka hor inta aysan gelin, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah ama marka ay si cad u habboonayn.

## Cabashooyin

Bukaanka waa in la dhiirrigeliyaa lana caawiyaa, inta ay ku sugan yihiin xarunta ama inta ay socoto daaweyntooda, si ay u fahmaan una adeegsadaan xuquuqdooda bukaan ahaan iyo muwaadin ahaan. Bukaanka waxay cabashooyin soo gudbin karaan, waxayna soo jeedin karaan isbeddello ku saabsan siyaasadaha iyo adeegyada xarunta, iyagoo la hadlaya shaqaalaha xarunta ama dad kale oo ay doortaan, iyada oo aan lagu samayn xannibaad, faragelin, khasab, takoorid, ama aargoosi, oo ay ku jirto hanjabaad ah in la saaro ama la joojiyo adeegga. Ogeysiinta ku saabsan habraaca cabashada ee xarunta ama barnaamijka, iyo sidoo kale cinwaannada iyo lambarrada taleefanka ee Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka (Office of Health Facility Complaints), waa in lagu dhejiyaa meel si cad u muuqata.

U hoggaansanaanta xarumaha qalliinka bukaansocodka ee Xeerka Minnesota 144.691, iyo u hoggaansanaanta ururrada daryeelka caafimaadka ee joogtada ah (health maintenance organizations) ee Qodobka 62D.11, waxaa loo tixgeliyaa inay buuxisay shuruudda ah in la helo habraac cabasho oo qoraal ah oo gudaha ah.

> Haddii aad qabto cabasho ku saabsan hay'adda ama qofka ku siinaya adeegyada qalliinka bukaansocodka, waxaad wici kartaa, qori kartaa, ama booqan kartaa Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka ee Waaxda Caafimaadka ee Minnesota. Waxa kale oo aad la xiriiri kartaa Xafiiska Difaacaha (Ombudsman) ee Daryeelka Mudada-Dheer.

**Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka (Office of Health Facility Complaints)**
(651) 201-4200/1-800-369-7994
health.ohfc-complaints@state.mn.us
Cinwaanka Boostada:
Minnesota Department of Health
Office of Health Facility Complaints
P.O. Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970

**Xafiiska Difaacaha Daryeelka Mudada-Dheer (Office of Ombudsman for Long-Term Care)**
PO Box 64971
St. Paul, MN 55164-0971
1-800-657-3591 or 651-431-2555 (metro)
Office of Ombudsman for Long-Term Care (https://mn.gov/ooltc/)
MBA.OOLTC@state.mn.us

Minnesota Department of Health
Health Regulation Division
PO Box 64900
St. Paul, MN 55164-0900
651-201-4200
health.fpc-licensing@state.mn.us
www.health.state.mn.us

1/12/2026

*Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, wac: 651-201-4200.*